

Go'aan

 Ursula Nafula

 Vusi Malindi


 Abdi Muse

 Somali


 Level 2

(imageless edition)





Tuuladayda waxay lahayd
dhibaatooyin badan. Waxaan
samaynay saf dheer si aan biyo
ooga soo dhaansano tuubada.




Waxaan sugnay raashin ay nagu
deeqeen dad kale.




Waxaan xirnay guryahanaga amin
hore sababta oo ah tuugo.



Caruur badan ayaa dugsiga ka baxday.




Gabdhaha yaryar waxay ka shaqeeyeen sidii adeegto tuulooyinka kale.




Wiilasha yaryar waxay ku
wareegeysteen agagaarka tuulada
halka kuwa kale na ay ka
shaqeeyeen beeraha dadka.




Markii dabayshu kacdo, waraaqaha qashinka ayaa ka lalmado geedaha iyo dayrarka.




Dadka waxaa jarjaray dhalooyin
jajaban kuwaa oo loo tuuray si
taxadar la'aan ah.




Kadib hal maalin, tuubada ayaa
biyo la'aan laga dhigay
weelashanadana faaruq bey
ahaayeen.




Aabahay ayaa guri guri ugu tagay
asagoo waydiinayo dadka in ay ka
qayb galaan shirka tuulada.




Dadka waxay iskugu soo urureen
geed wayna hoostiisa wayna
dhagaysteen.




Aabahay ayaa istaagay waxuuna yidhi, “Waxaan u baahanahay in aan wada shaqayno si aan u xallino dhibaatooyinkeena.”




Juma oo sideed jir ah, oo kufadhiyo
jirrida geedka ayaa ku qeyliyay,
“Waan kaa caawin karaa
nadiifinta.”



Haweeney ayaa tiri, “Dumarka way igu soo biiri karaan si ay u beeraan cuntada.”



Ninkale ayaa istaagay oo na yidhi,
“Raggu waxa ay qodi doonaan
ceel.”



Dhammaanteen waxaan ku dhawaaqnay, “Waan ku qasbanahay in aan badelno nolosheena.” Maalintaas laga bilaabo waxaan ka wada shaqeynay inaan xallino dhibaatooyinkeena.



Storybooks Canada

storybookscanada.ca

Go'aan

Written by: Ursula Nafula

Illustrated by: Vusi Malindi

Translated by: Abdi Muse

This story originates from the African Storybook (africanstorybook.org) and is brought to you by Storybooks Canada in an effort to provide children's stories in Canada's many languages.



This work is licensed under a Creative Commons
[Attribution 4.0 International License](https://creativecommons.org/licenses/by/4.0/).